


# SIDA LOO ISTICMAALO WARANKIILADA QUBEYSKA

Warankiilada qubeyska waxay caawisaa yareynta tirada bakteeriyo ee maqaarka si aysan canbaartu aysan u caabuqin. Qubeysyada warankiilada waxaa loo isticmaali karaa in lagu maareeyo cambaarta carruurta iyo dadka waa weyn.


## Waxaad u baahan doontaa:

- Tuubada qubeyska
- Biyo – oo aan ka kululeyn ilaa 30°C
- Baaldiga guriga oo 10L ah
- Warankiilada White King guriga ee aan la carfin - 12mL ee 10 kii litir ee biyaha ah


- Saliida qubeyska - 1-2 fur buuxa oo qubeys haddii lagu taliyo
- Cusbada miiska ama berkada – 1/3 oo 10 litir oo biyo ah haddii lagu taliyo



Ka hor intaadan bilaabin dhaq oo qalaji gacmahaaga.




Ku buuxi qubeyska biyo ilaa heerka loo baahan yahay adoo isticmaalaya baaldi 10 litir ah si aad u cabirtid inta biyo ee aad ku dareysid.




## TIP

Waxaa laga yaabaa inaad dooneysid ku calaamadeynta heerka biyaha qalinka aan tirtirmin ama teeb xoog badan oo ku dhegaya saa daraadeed waxaad u baahan tahay oo kaliya inaad mar cabirto.




Ku dar 12mL ee kasta oo warankiilo ah 10 ka litir ee biyaha ah ee lagu shubo qubeyska (qubeys ka qoyska oo kala bar buuxa, ku dar 1/4 oo ah koob warankiilo]. Haddii lagu taliyey ku dar cusbo iyo saliida qubeyska.




Ku dar 1-2 koob oo buuxa oo saliida


Ku dar 1/3 oo koob cusbo ah baaldiga 10 litir kii kasta ee biyo ah ee lagu shubay qubeyska.




Ugu qubee ilmahaaga qubeyska adoo hubinaya inaad qoyso ilmaha wejigiisa iyo madaxa, adoo ka taxadaraya inaad biyo gaarsiin ilmaha indhihiisa.



Haddii ilmahaagu qabo nabarada cambaarta iyo qolfo, si debeansan u nadiifi goobahan si aad isugu daydo oo aad ugu qoyso qolofa.



Islamarka ilmahaagu uu nadiif noqdo, ka bixi qubeyska warankiilada – ha biyo raacin ilmahaaga ka dib markuu qubeysto. Ku qalaji ilmahaaga adoo si tartiib ah u maraniya shukumaan.



Mari nooca hormoonka ah iyo qoysada sida uu kuu tilmaamay Xirfadlaha kalkaalisada ama dhakhtarka.